Policy Briefing

HIPS

# Qiimeyn:
## 100-kii maalmood ugu horreeyey ee xukuumadda

**3-dii March, 2013, Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon ayaa hortagey baarlamaanka, wuxu-una soo bandhigay wax-qabadkii dowladdiisa ee 100-kii maalmood ee ugu horreeyey. Istiraatii-jiyadda is-xilqaanka ku dhisan ee aan sugeyn inta baarlamaanku dowladda uu u yeerayo, waa mid ammaan mudan. Waxay muujinaysaa fahamsanaanta xukuumadda ee isku dheelli-tirnaanta hay'adaha qaranka iyo awoodda kormeer ee baarlamaanka, waxayna dhiirri gelinaysaa in Soomaaliya ay ka hirgasho hannaan maamul oo oggol furfurnaan iyo isla-xisaabtan. Intaas waxaa dheer, tallaabadan billowga ahi waxay muujinaysaa in madaxda siyaasadeed ee qaranku ay faha-msan yihiin in shacabka - oo ay matalayaan wakiilladooda - ay filayaan wax-qabad deg-deg ah oo la taaban karo.**

**Dhanka kale, boqol maalmod waa wakhti aad ugu yar in lagu qiimeeyo waxqabadka dowladda Soomaaliya, iskaba daa in loo daadago ama laga hadlo guulaha ay gaartaye. Sidaas oo ay tahay, kol haddii dowladdu ay soo bandhigtay waxqabadkeeda, waa lagama maarnaan in la qiimeeyo sheegashada dowladda iyo jihada ay ku socoto. Is-xasuusin uma baahna in markasta maanka lagu hayo in xaaladda Soomaaliya hadda ka jirta iyo in dowladdu ay ku dhex shaqaynayso xaalad siyaasadeed, amni iyo dhaqaale oo adag mar kastana is-badeli karta oo aad u nugul.**

**Waxaa ugu mudan ee boqol maalmood ay dowladdu ku samayn kartey waxa ay ahaayeen dhagax dhigga ama billowga aasaas wanaagsan oo isugu jira shuruuc, hab-raac iyo hannaan maamul oo Soomaaliya ku toosin kara tubta maamul wanaagga. Waa la is oran karaa in xukuumaddu ay dhabbihii saxda ahaa qaadday marka la eego toddobada sharci ee Golaha Wasiirrada ay ansixi-yeen sida sharciga maaliyadda, garsoorka, xuquuqda insaanka, tariifada, halka siddeed kalana ay miiska saaran yihiin, sida sharciyada dib-u-habaynta booliiska, war-is-gaarsiinta, saxaafadda iyo shidaalka. Haddiise loo gudbo himilooyinka iyo qorshayaasha dowladda, halkanna aan lagu soo koobi karin, natiijada waxqabadka dowladdu waa mid isku-dhafan oo laga dheehan karo isku-dheelli tirnaan la'aan siyaasadda gudaha iyo midda dibadda, gaabis xallinta caqabadaha dhaqaale iyo siyaasadaha murugsan, muujin dareen ay ka muqato is-cajabin iyo isku-dheellitirnaan la'aan iyo is-buurasho ka muuqata madaxtooyada iyo Golabha Wasiirrada.**

### Siyaasadda Dibadda

Dhanka xiriirka dibadda, Madaxweynuhu wuxuu safarro miisaan leh ku tagey caasimado badan sida Washington, London, Ankara, Brussels, Kampala, Dooxa Nairobi, Qaahira, Addis iyo Riyaad, halkaas oo uu caalamka u caddeeyey in dowladdiisu aysan ku-meel-gaar ahayn. Dowladdu waxay dowr muuqda ku lahayd khafiifinta cunaqabataynta hubka ee Soomaaliya, iyadoo sidoo kale is hortaagtay dalabkii Kenya ee ay Golaha Ammaanka uga codsatay in loo sharciyeeyo loona maal-galiyo ciidammo badeed Soomaaliya ka hawl-gala, meeshii Soomaaliya laga caawin lahaa loona dhisi lahaa ciidan amni. Dowladdu waxay kaloo ku ammaanan tahay in ay si muuqata u diidday in Soomaaliya loo farageliyo si la mid ah qaababkii xilliga ku meel gaarka ahaa. Tallaabadii ugu dhiirranayd ee dowladdu ay qaadday – taas oo ay ka diideen Ethiopia iyo Kenya – waxay ahayd diidmadii Barnaamijka Ballaaran ee Xasilinta IGAD, kaas oo ahaa qorshe labadaas waddan ee dariska ah- iyaga oo adeegsanaya magaca urur-goboleedka IGAD - ay abaabuleen dabayaaqadii xilligii ku-meel-gaaarka, kaas oo iyaga awood u siinaya in ay maamulo u dhisaan gobollada iyo degmooyinka laga saaro kooxda al-Shabaab.

Sidaas oo ay tahay, haddana waxay u egtahay in siyaasadda dibadda ee dowladdu ay sabbeyneyso, dowladduna aysan-ba diyaarsan mabaadii'idii hagi lahayd iyo khibraddii ay isugu dheelli-tiri lahaayeen dalalka Soomaaliya saaxiibka la ah iyo kuwa Soomaaliya saamaynta ku leh. Safarrada madaxweynaha ee dibaddu, sidii kuwii madaxweynayaashii ka horreeyey, waxay u eg yihiin, kuwo uu fardo badan saaran yahay. Waxay u muuqataa in dowladdu ay isku si ula dhaqmayso dalal Soomaaliya jaal u noqon kara, iyo kuwo dano Soomaaliya ka leh, taasina waa istiraatijiyad khatarteeda leh.

Dalalka qaar, sida Uganda iyo Burundi, wiilashooda ayaa u naftooda u huray si Soomaaliya xasillooni iyo qaranimo loogu soo celiyo. Kuwo kale, sida Turkey, uma kala harin dowlad iyo shacab, gurmadkii Soomaaliya looga saaray go'doonkii caalamiga ahaa ee dheeraa. Maraykanka iyo Talyaanigu muddo dheer ayay bixinayeen mushaarka ciidanka dowladda. Dalal kale sida Djibouti gurmadkoodu ma kala go'in, halka kuwo kale ay saamayntoodu ku astays-nayd ka shaqaynta iyo hirgelinta siyaasad

liddi ku ah qarannimada Soomaaliya, kuna jiheysan kala irdheynta shacabka Soomaaliyeed.

Sidaas darteed, in kasta oo dusha sare la moodo in ay dowladdu gaartey guulo diblomaasiyadeed, hadana, waxaa la oran karaa,dabaal-joog-laha diblomaasiyadda dowladda iyo dhaqanka ay marba dal cusub isku duubayso, waxaa ka dhashay in dalalkii garabka u noqon lahaa dadka, dalka iyo dowladda Soomaaliyeed ay is-weydiinayaan ama la yaabban yihiin qaabka ay dowladddu wax u rabto. Dowladda waxaa la gudboon in ay diyaariso, soona bandhigto, kuna hawl gasho qorshe diblomaasiyadeed oo cilmiyaysan oo xaqiijiya danaha qaranka.

## Culeysyo Dhaqaale iyo Siyaasadeed

Xukuumaddu illaa haatan sidii la rabay uma hirgalin ajandayaasheedii arrimaha gudaha. Qodobka ugu muhiimsan qorshahe-hawleedka Lixda-Qodob ee madaxweynaha, kaddibna xukuumaddu ay qaadatay, waxa uu ahaa soo noolaynta dhaqaalaha iyo daboolidda danaha daruuriga ah ee danyarta. Asbuucyadii ugu danbeeyey, awoodda wax gadasho ee danyarta iyo dadka noloshooda hela ee caasimadda iyo gobollada ku teedsan si weyn ayay hoos ugu dhacay, sarrifka doollarka Maraykanka ee ku aaddan Shilin Soomaaliga oo hoos u dhacay awgeed. Dhanka kalena qiimaha maciishadda daruuriga ah sidiisii ayuu u sarreeyaa, taasoo malaayin danyar ah duruufahooda sii adkaysay. Qaabka ay dowladdu u wajahday carqaladdan dhaqaaale wuxuu ahaa mid iska hor-imaanaya ama ugu yaraan ay ka muuqato meel soke wax-ka-eegis.

**Siyaasadda Lixda Tiir ee Dowladda**

1. La hirgeliyo hay'ado qaran oo shaqaynaya
2. La dar-dar geliyo sookabasho dhaqaale
3. Nabadda dhidibada loo aaso
4. Shacabka khidmooyin loo qabto
5. Xiriirka dibadda la xoojiyo
6. Laga shaqeeyo, dib—u-heshiisiin, is af-garad iyo midnimo

Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud waxa uu arrinta sarrifka ku macneeyey mid ka dhalatay isbaddelkii dowladdu hirgelisay, waxa uuna bulshada caalamka ugu baaqay in ay deeq cunto ah soo gaarsiiyaan dadka saboolka ah. Duqa magaalada Muqdisho waxa uu dhibaatada sarrifka dusha u saaray ganacsatada iyo sarriflayaasha, halka wasiirada mid ka mid ahina uu sheegay in dad dollar boorsooyin ku wata oo cidda ay u shaqaynayaan aanay caddayn ay suuqyada Muqdisho iyo gobollada dhexe ka xaalufiyeen shillin Soomaaligii. Qiimayntaan aan hoos u qodnayn waxay muujinaysaa ka baaqsiga dowladda iyo ku guul-darraysiga xallinta dhibaatooyinka iyada oo loo marayo daraasad iyo daaweyn ku salaysan aqoon ay hormuud ka tahay hay'adda hawsha leh.

Dhanka siyaasadda, booqashooyin Ra'iisul Wasaaraha ee gobollada dalka ee loogu magac daray socdaalkii dhageygsiga, xoogaa waa ay qaboojisay xiisadihii jirey isagana siyaasad ahaan waa uu soo muuqday. Dowladdana guul ayay u ahayd in ay maamullo u soo dhisto deegaanno ka tirsan gobolka Galguduud kaddib wada hadallo ay la gashay kooxda Ahlu Sunna Wal-jamaaca oo degaannadaas gacanta ku haysay. Waxay kaloo dowladdu ku ammaanan tahay in ay maamullo ka sameyso Hiiraan iyo Baay, in kasta oo caqabado ay kala kulmeen. Sidoo kale, tegidda Ra'iisul Wasaare Saacid uu tagey Puntland iyo Galmudug waxay ahayd tallaabo dhiirri gelineysey midnimada, wax-wadaagga iyo isku-fur-furnaanta taas oo dowladda magaceeda iyo awooddeeda ku fidineysa meelo dhaafsiisan caasimadda Muqdisho.

Sidaas oo ay tahay, is-af-garanwaa siyaasadeed oo waaweyn ayaa jira. Is-fahan la'aanta la xiriirta arrinta Jubbaland, waa ay sii xumaanaysaa, kaddib markii Dowladda Federaalka ahi ay aqoonsan weydey shirweynaha beelaha Kismaayo. Ra'iisul Wasaare Saacid iyo golihiisa wasiirradu gaashaanka ayay ku dhufteen isku dayga maamul goboleed loogu samaynayo deegaannada gobollada Gedo iyo Jubbooyinka, iyaga oo adeegsanaya dood salka ku haysa in arrintaasi ay tahay mid dastuurka ka hor imaanaysa. In taladu faraha ka baxdo, oo xaaladdu ay cirkaisku sii shareerto, laba sababood-ba dowladdu waa ay ugu khaldan tahay. Waa midda hore'e, khilaafka ka taagan arrinta Jubbaland sida dowladdu u dhigayso ma ahan arrin dastuur, ee waa arrin siyaasadeed oo u baahan xal siyaasadeed. Tan kale, guud ahaan lahjadda kulul ee xukuumaddu ma ahan mid u adeegaya dibu-heshiisiinta.

Inkastoo ay arrinta Jubbaland tahay mid qallafsan, haddana sida dowladdu uga hawl-gashay ma ahayn mid xikmadaysan. Ra'iisul Wasaare Saacid - oo lagu ammaano in uu yahay siyaasi ku wanaagsan wax-isku soo dhaweynta - sababta qaddiyadda Jubbooyinka horrayba looga hawl gelin waayey, ma aha oo kaliya arrin yaab leh, waase arrin bannaanka soo dhigaysa sida ay dowladdu ugu fashilan tahay in ay fursadda ka faa'iideysato si ay u furdaamiso, xaajooyinka cakiran. Ra'iisul Wasaare Saacid, wuxuu kasoo jeedaa mid kamid ah beelaha ku loollamaya xukunka Kismaayo. Maadamaa uu madax ka yahay hay'adda fulintana, cid uga fara-dhuudhuuban ma jirto farsamaynta xaaladda cakarin. Haddase, xaaladdu waxa ay ku soo ururtay in fursadda ay dowladdu wax ku furdaamin karto ay sii fogaanayso, taas oo sababi karta in gacmaha la iskula tago.

Arrin kale oo taagan, waa musuq-maasuqa oo weli bahsan. In kasta oo aanay suurto gal ahayn in boqol maalmood gudahood ay xukuumaddu ku cirib-tirto musuqmaasuqa, haddana waa arrin laga naxo in xatooyadu ay si caadi ah u socoto, dadkii ku caan-baxayna ay wali dhabbacan yihiin ilaha dhakhliga qaranka. Qandaraasyadda dowladda iyo wax soo iibsiga dowladdu-ba ma maraan kormeer waafaqsan hannaanka hanti dhowrka hufan, iyada oo weliba miisaaniyadda hay'adaha aan toos loola

socon, si rasmi ahna aan dabagal loogu samayn siday ku bexeen. La dagaallanka xatooyada xoolaha dadweynaha oo ka mid ah ahmiyadaha ugu horreeya ee dowladda, waa in ay ka billaabataa in la dumiyo kooxaha xoolaha shacabka dhunsanaya, iyadoo sharciga lala tiigsanayo shakhsiyaadka dambigaas lagu helo.

## Isku-Dheelli Tirnaan La'aanta Hay'adda Fulinta

Golaha Wasiirrada oo markii hore loo dhigay in uu noqon doono mid kooban, ayaa sii noqonaya mid waxqabadkiisu hooseeyo.In kasta oo boqol maalmoodna ay shaqada ku jiraan, haddana lixda qodob ee madaxweynuhu ku dhawaaqay in ay siyaasad u yihiin ma jiraan mid golaha wasiiradu ay guulo la taaban karo ka gaareen. Inta badan wasiirradu waxay ku jiraan safarro, waxaana ku baahday shaqada, iyada oo xilligii lagu diyaarin lahaa qorshe dheer lana hirgelin lahaa qorshaha dhow iyo dhexe intiisii badnayd uu qaatay dab-demis iyo la daalaa dhicidda xaalado soo darriyey.

Dhanka kale, waxaa jira dareen aad u baahsan oo tilmaamaya isku dheelli-tirnaan la'aan u dhaxeysa labada xafiis ee fulinta ugu sarreeya, Madaxtooyada iyo Xafiiska Wasiirka 1-aad ama Golaha Wasiirada. Arrintani waa mid dhinac siyaasad ka ah, dhinac dastuuri ah, dhinaca kalana aan ka marnayn hab-dhaqanka iyo doonidda madaxda. Badanaa,Somaalidu waxaay awoodda ka ag dayaan madaxweynaha, maadaama uu yahay masuulka doorashada ku yimid, walow, dasuurku uu awoodda badankeeda siinayo Galaha Wasiirrada oo Ra'iisul Wasaaruhu hoggaan u yahay. Madaxweynuhu, waxa uu unkay unug la-taliyayaal oo ay kamid yihiin xubno aqoon iy khibrad durugsan leh, taas oo tallaabo wanaagsan ah, lataliyayaashaas oo kala taliya dhammaan arrimaha Qaranka. Arrimaha aan lagu tala gelin oo ka dhashay tallaabadan wanaagsan waxaa ka mid ah in dadka ka didsan hannaanka maamul ee madaxweynaha ay ku doodaan in Madaxtooyadu ay noqotay gole fulineed oo barbar socda lana wareegay shaqadii Golaha Wasiirada.

Tuhunka ah in Madaxtooyadu iska-ballaarisay awoodaha dastuurku u ogolyahay ma aha arrin caawinaysa dib-u-heshiisiinta iyo dib u yagleelidda qaran Soomaaliyeed. Iyada oo ay jirto in madaxweynuhu uu yahay mas'uulka la doortay, ayna ku habboonayd in uu isagu haysto awoodda ugu badan ee dastuuriga ah, haddana dowladaha Soomaaliya waa kuwo tabar daran, waxayna baahi weyn u qabaan abqalaad iyo oggolaanshaha inta badan dadka Soomaaliyeeed. Haddaba si dowladda iyo madaxda qaranku ay u helaan taageerada iyo hoggaansiga shacabka, waa in ay dugsadaan ku dhaqanka iyo dhawridda dastuurka, dib-u-heshiisiinta iyo dowlad-wadaagga.

## Gunaanad

Waa arrin wanaagsan in dowladdu ay ogoshahay in lala xisaabtamo lana qiimeeyo. Saddex bilood-se ma aha wakhti lagu gaari karo waxqabad qoto-dheer iyo qiimayn sax ah. Sidaas oo ay tahay, dulmar guud oo lagu sameeyo qorshayaasha iyo waxqabadka dowladda, waxay tilmaan guud ka bixin karaan wixii dowladdu ay garab martay iyo dhinaca ay geeddi utahay. Markii qiimayn lagu sameeyo sheegashooyinka iyo qorshayaasha dowladdana, waxaa soo baxaysa geeddi socod meel dhexe ah. Shakina ma laha in culaysyo duruufuhu keeneen, iyo tabar darri guud ay dowladda u diideen in ay gaartoa hadafyadeedii waaweynaa. Waana hubaal in niyad wanaagga dowladda ay mararka qaar adag tahay in loo tarjumo waxqabad; iyada oo dhanka kalana xiisaha iyo doonista aan xaqiiqada ku salaysnayn ee shacabku ay keentay saluug iyo eedayn, haddana isku cel-celis waxaa la oran karaa, gaabinba ha jirtee, dowladdu jidka kama dhunsana.

Safarkii Wasiirka 1-aad ee la tashiga gobollada iyo masuuliyiinta deegaannada u tageyna waxa ay ahayd arrin loo baahnaa. Sidoo kale, aasaaska guddiga la taliya madaxweynahana waa talaabo tayo ku soo kordhisay Madaxtooyada, guulaha aqoonsiga ee siyaasadda arrimaha dibadda iyo khafiifinta cunaqabatayntuna waa guulo muuqda.

Dhanka kale, isu-dheelli-tirnaan la'aanta waxqabadka dibadda iyo kuwa guduhu waa arrin laga welwelo. Waxaa sidoo kale walaac ka imanayaa is-buurashada xafiisyada fulinta ee dalka ugu sarreeya, waayo waxaa madaxtooyada lagu eedaynayaa in ay gacmo-gacmaynayso hawlaha dastuurku u gooni yeelay Golaha Wasiirada. Golaha qudhiisuna waa mid ka gaabiyey in uu dowladnimada salka u dhigo, tirada oo yar iyo hay'ado tayo leh oo aan weli diyaar ahayn darteed. Ugu danbayn, xiisadda Jubbland waa daba dheeraatay, kooxaha musuqmaasuqa ku eedaysanna weli waxay horjoogayaal ka yihiin ilo dekhli, taas oo dowladda Soomaaliyeed aysan marna cudur-daar ku heli karin.

## Talooyin

### Ku socda Dowladda Federaalka:

- Xubnaha golaha wasiirada ha laga ballaariyo tobanka ay hadda yihiin, hana la gaarsiiyo 18-kii ay awalba ahaayeen, si daawo leegu helo gaabinta hadda jirta, talada wax looga siiyo dhammaan qaybaha bulshada, looguna wada is-taago qorshe hawleed qaran oo la isla qaado.
- Waa in dib loo soo celiyo isu-dheelli-tirnaanta dastuurku ugu tala galay xafiisyada Madaxtooyada iyo kan Wasiirka 1-aad, madaxweynuhuna waa in uu gutaa waajibaadka dastuurku amrayo oo ah hirgelinta dastuurka iyo shuruucda dalka, una ogoolaadaa Golaha Wasiirada in ay maareeyaan howlaha dalka.
- Waa in la suura geliyo jewi ay ku imaan karto midnimo qaran, waana in madaxda qaranku isku arkaan maamulayaal la maamuusay ee hanaanka siyaasadda dalka, ayna ogaadaan in aysan ahayn mulkiilayaal madax-bannaan.
- Waa in dowladdu xididdada u siibtaa kooxaha musuq-maasuqa ku shaqaysta kuna badashaa maamulayaal leh aqoon iyo sumcad, waayo taas ayaa dowladda u sahli kartaa in ay dakhli dalka ka hesho, duniduna aaminto.
- Sida ugu dhakhsaha badan waa in dowladdu ku qaban-qaabisaa kulan looga tashanayo sidii dhaqaalaha dalka dib loogu soo noolayn lahaa, kulankaas oo gacan ay ka geysan karaan Hay'adda Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka.
- Waa in xal deg-deg ah loo helaa culayska ka dhashay sarrifka shillinka iyo doolarka, hoos u dhaca awoodda wax-gadasho ee shacabka, qiimaha sarreeya ee maciishadda, taas oo ku imaan karta in ay ka wada tashadaan madaxda siyaasadda, kuwa dhaqaalaha, aqoonyahanka iyo hay'adaha caalamiga ah ee maaraynta lacagaha.
- Khilaafka Jubbooyinka waa in lagu soo af-meeraa heshiis ku meel gaar ah oo labada dhinac-ba u cuntama, qayb-na uu ka yahay in la qabto, laba sano gudohood, doorasho dadka degaannadaas ay kusoo xulanayaan guddoomiyayaal degmo, kuwo gobol iyo kuwo maamul goboleed.

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay. Iyadoo ah xaruntii maskax-maalka ee ugu horreysay Soomaaliya, hadafkeedu waa inay xog iyo saameyn ku yeelato jaan-goynta go'aammada siyaasiga ah, iyadoo u mareysa daraasado cilmi-baaris iyo falanqeyn ku saleysan. Machadku wuxuu kaloo doonayaa inuu ka qayb qaato hana-qaadka iyo hirgalinta dhaqan aqoon iyo cilmi-baaris ku saleynsan.

www.heritageinstitute.org • info@heritageinstitute.org

© MACHADKA HERITAGE EE DARAASAADKA SIYAASADDA, 2013